Victorian Equal Opportunity
& Human Rights Commission

# Takoorka jinsiyadeed ee shaqada: Waa maxay mas'uuliyaddayda?

Milkiilayaasha loo shaeeyo ee Victoria waxaa saaran waajibaadyo sida uu qabo *Sharciga Fursadaha Loo Siman Yahay 2010* (Vic) si looga hortago oo looga jawaabo takoorka jinsiyadeed ee goobta shaqada.

Takoorka jinsiyadeed waa dhibaato joogto ah oo ka jirta goobaha shaqada ee Victoria.

Milkiileyaasha loo shaqeeyo waxa ku waajib ah sida uu dhigayoaan Sharciga Fursadaha Loo Siman Yahay in aanay shaqaalaha ku takoorin isir ahaan. Milkiileyaasha loo shaqeeyo waxay sidoo kale leeyihiin 'waajib togan' si ay u qaadaan tillaabooyin macquul ah oo saamile ah si ay u baabi'iyaan takoorka, dhibaataynta galmada, iyo in qof dhibaato loo geysto intii suurtogal ah.

Si looga hortago loogana jawaabo takoorka jinsiyadda aadna u noqoto qof soo horjeeda midab-takoorka ka dhaca goobta shaqada, milkiilayaasha loo shaqeeyo waxay u baahan yihiin inay marka hore fahmaan oo aqoonsadaan saamaynta taariikhiga ah iyo tan joogtada ah ee jinsi takoorka ee ay la kulmaan Ummadaha Koowaad iyo shaqaalaha kale ee la hayb sooco.

## Marka laga hadlayo Xeerka Fursadaha Loo Siman Yahay yuu saaran yahay waajibaadyo?

Xeerka Fursadaha Loo Siman Yahay waxa uu daboolayaa qaybaha muhiimka ah ee nolosha dadwaynaha, oo ay ku jirto shaqada. Milkiilayaasha loo shaqeeyo waxaa ku waajib ah in ay intii macquul ah baabi'iyaan jinsi takoorka ka dhanka ah shaqaalaha.

'Milkiilayaasha loo shaqeeyo' waa urur kasta ama qof kasta oo shaqaaleysiiya qof kale.

## Halkee lagu ilaaliyaa shaqaalaha?

Shaqaalaha (oo ay ku jiraan shaqaale mushahar qaata, kuwa tababarka shaqo kujira ee mushaharka qaata, iyo codsadayaasha shaqada) iyo qandaraaslayaasha waa la ilaaliyaa:

- shaqada
- meelaha la wadaago (barkinada, wiishashka, meelaha qaabilaada iyo musqulaha)
- inta lagu guda jiro dhacdooyinka la xiriira shaqada, shirarka, iyo goobaha (tusaale xaflad ama safar shaqo)
- goobaha internetka.

## Sidee bay takoorka, aflagaadada iyo dhibaatada qofka loo geysto ee goobta shaqada u egtahay?

Xeerka Fursadaha Loo Siman Yahay waxa uu mamnuucayaa isir takoorka goobta shaqada ee ay geystaan milkiilayaasha loo shaqeeyo iyo shaqaalaha kale labadaba. Tan waxaa ka mid noqon kara midab-takoor u dhexeeya dadka (labadaba mid cad iyo mid aan qarsoonayn), xad-gudubyada yaryar, eexda ururka ama nacayb ku aadan baahiyaha dhaqanka.

- **Takoorka jinsiyadeed** waxay noqon kartaa mid toos ah iyo mid aan toos ahayn. "Jinsiyada" waxay ka kooban tahay midabka maqaarka, abtirsiinta, dhalashada, asalka qowmiyadeed ama sifooyin kasta oo la xidhiidha jinsiyad gaar ah.

  **Takooridda tooska ah** waa marka uu qof ula dhaqmo qof kale si aan xaq ahayn isirkiisa awgeed.

  > ***Tusaale ahaan:*** *Milkiile loo shaqeeyo ayaa diiday shaqaale u qalma shaqada oo asal ahaan kasoo jeeda Sri Lanka inuu dalacsiiyo sababo la xiriira jinsiyadooda, asagoona markaas sheegay inuu doorbidayo inuu dalacsiiyo 'Australiyaanka dhabta ah'.*

**Takoorka aan tooska ahayn ee jinsiyadda** waa marka ay jirto shuruudo, xaalad ama dhaqan aan cadaalad ahayn oo wax u dhimaya ama saamaynaya shaqaalaha sababo la xiriira jinsigooda.

> ***Tusaale ahaan:*** *Shirkad wax nadiifisa ayaa soo dhejisay xayeysiis ah inay u baahan yihiin nadiifiye cusub waxaana kujira shuruud ah in si fiican uu qofka loo baahan yahay ugu hadlo una akhriyo Ingiriisiga. Tani waxay wax u dhimaysaa shaqaalaha laga yaabo inay noqdaan nadiifiyeyaal karti leh laakiin aan aqoon sare u lahayn Ingiriis. Tani maahan shuruud macquul ah marka loo eego nooca shaqada.*

- **Aflagaado** waa hab-dhaqan guud ah oo ku dhiirigalinaya dadka kale inay nacaan ama ku jeesjeesaan qof ama koox dad ah iyadoo taasna loo sababeynayo midabkooda ama diintooda. Si aad u fahamto farqiga u dhexeeya cayda iyo jinsi takoorka, eeg 'Cutubka 3: Fahamka sharciga cunsuriyadda ee goobta shaqada' ee ***Tilmaamaheena: Jinsi takoorka goobta shaqada***.

  Milkiilayaasha loo shaqeeyo waxay si weyn masuul uga noqon karaan cayda haddii ay dhacdo.

  > ***Tusaale ahaan:*** *maamulaha oo meel fagaare ah shaqaale ugu tilmaamay dambiile caajisloow ah, sababo la xiriira isirka, isaga oo sheegay in qof kasta oo ay isku asal yihiin uu caajis badan yihiin aananna la aamini karin, kuna dhiirigeliyay shaqaalaha kale inay nacaan.*

- **Dhibane** waa marka shaqaalaha loola dhaqmo si xun sababo la xiriira inay ka hadleen arrin ama ay sameeyeen cabasho ku saabsan jinsi takoor ay qof ku eedeeyeen ama dhaqan kale oo sharci darro ah.

  > ***Tusaale ahaan:*** *Shaqaale Ghana u dhashay oo soo sheegay dhacdo jinsi takoor ah ayaa loo qoondeeyay isbeddello iyo hawlo aan loo baahnayn taasoo u muuqata in maamulku ay ka aargoosanayaan.*

## Sideen goobta shaqadayda uga baabi'iyaa jinsi takoorka?

Si meesha looga saaro jinsi takoorka, milkiileyaasha loo shaqrryo waa inay qaadaan tillaabooyin muuqda si ay u gutaan waajibaadkooda sharciga ah ee ah inaysan takoorin iyo waajibaadkooda togan ee ah inay si firfircoon uga hortagaan ugana jawaabaan jinsi takoorka sida ku qeexan Xeerka Fursadaha siman.

Guddiga Fursadaha Sinaanta iyo Xuquuqda Aadanaha ee Victoria waxay soo saareen shan heer oo ah heerarka ugu yar oo dhammaan milkiileyaasha loo shaqeeyo ay tahay inay u hoggaansamaan si ay ugu dhaqmaan waajibaadka togan ayna u abuuraan goob shaqo oo ka soo horjeeda midab-takoorka.

Heerarka ayaa daboolaya:

- aqoonta wax ku oolka ah ee loo baahan yahay si loo aqoonsado jinsi takoorka
- sidii looga hortagi lahaa jinsi takoorka dhaca iyadoo loo marayo hababka iyo dhaqanka ururka
- sida si wax ku ool ah looga jawaabo jinsi takoorka marka ay dhacaan.

**Heerarka ugu yar ee ka hortagga iyo ka jawaabista takoorka jinsiyadda**

**Heerka 1:**
**Aqoonta jinsiyadeed**

**Heerka 2:**
**Sharciyada iyo nidaamyada**

**Heerka 3:**
**abaabulka Dhaqanka**

**Heerka 4:**
**Soo-sheegis iyo jawaabta**

**Heerka 5:**
**Horumar joogto ah**

**Wixii macluumaad dheeraad ah, soo dejiso Guddiga *Tilmaamaha: Takoorka jinsiyadeed ee goobta shaqada* laga heli karo Humanrights.vic.gov.au/resources ama iyada oo loo marayo lambarka QR.**

*Macluumaadkan waxaa loogu talagalay hagid ahaan kaliya. Ma aha beddelka talo sharci.*